Seattle Ethics & Elections Commission

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Bruce Harrell
Magaca Ololaha: Bruce oo u taagan Seattle
Bogga Internet-ka ololaha: BruceForSeattle.com
Xilka Magaalada: Duqa Magaalada
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (206) 486-0377
Hordhaca Musharaxa:

Waxaan u tartamayaa Duqa magaalada si aan u mideeyo Seattle inagoo ku salaynayna waxa kuligeen dani inoogu jirto taas oo ku dhisan cadaalad iyo sinaan. Si wada jir ah, waxaan u qaadi doonaa talaabo geesinimo leh si aan wax uga qabano dhibaatooyinkeena hoy la'aanta ah, una horseedno dib u soo kabasho dhaqaale oo xoogan oo ay sameeyaan ganacsiyada yaryar iyo qoysaska Seattle, iyo inaan hirgelino dib u habeyn aan ku sameyno booliiska si loo bedalo habdhaqanka booliska, oo aan ahayn sida ay wax u qabtaan oo keliya, lana xaqiijiyo nabadgelyada DHAMMAAN qoysaskeena.

Waxaan ku soo barbaaray qoys ka mid ah dabaqada shaqeysa kana kooban laba jinsayadood, nolashayda oo idid Seattle ayaan ku noola kana shaqeynaayey. Waan jeclahay magaaladaan—cida aan nahay iyo cida aan noqon karnaba. Markaan ka mid ahaa Gollaha Deegaanka, waxaan ka shaqeeyay sidii aan u baabi'in lahaa caqabadaha hortaagan - Ansixinta sharciyadii ugu horeeyay ee Seattle ee ka hortaga eexashada booliiska, sidii looga saari lahaa arjiga shaqa raadiska su’aasha weydiinaysa in uu qofku dambi hore lahaa (ban-the-box) si looga hortago midabtakoorka ka dhaca goobta shaqada, iyo kordhinta taageerada carruurta BIPOC ee ku jira dugsiyadeenna dadweynaha.

Waxaan ku bilaabay ololahayga qorshayaal waxqabad leh oo wax looga qabanaayo arrimaha ugu waawayn ee Seattle hadda ka taagan, waxaanan wax ka qaban doonaa dhibaatada cimilada, waxaan yarayn doonaa ku dagaalanka qoryaha, waxaan hirgelin doonaa inuu gaadho daryeelka caafimaadku dadka Seattle deggan oo dhan, waxaanan maalgelin doonaa gaadiidka magaalada iyo habdhiska gaadiidka.

Ololahayaga aasisigu wuxuu u han weyn yahay inay heleen taageeradii ugu badnaynd ee isbahaysiga dadka kala duwan marka loo eego musharaxyada u cararaya Duqa Magaagalada, oo ay ka mid yihiin hogaamiyaasha bulshada Madowga ah iyo AAPI, Gudoomiyihii hore Gary Locke, Duqii hore Norm Rice, u doodayaasha xuquuqda madaniga iyo dib u habeynta booliska, iyo deriska Seattle oo dhan. Waxaa sharaf ii noqon doonta in aan helo taageeradaada.

Musharaxaan waxa uu ka qeyb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Lorena González
Magaca Ololaha: Lorena oo u taagan Seattle
Webseetka ololaha: www.Lorenaforseattle.com
Jagada Magaalada: Duqa Magaalada
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206.651.5668
Hordhaca Murashaxa:

Waxa aan ahayn jiilkii kowaad Maraykan ah qoyskayga oo waxaa isoo koriyay dad soogalooti ah oo shaqaale beero ka ahaa Badhtamaha Washington. Intii aan korayay, Seattle waxay ii ahayd himiladayda oo waxa aan noloshayda oo dhan geliyay iyada oo waxa aan galay kuuliyad, waxa aan qaatay shahaadada shariga oo aan ka qaatay Seattle U, waxa aan noqday looyar xuquuqda madaniga ah, oo waxa aan ku guursaday halkan.

Waxa aan u tartamay golaha deegaanka oo waxa aan ka shaqeeyay sidii aan iskugu keeni lahaa dadka sidii loo ansixin lahaa fasaxa qoyska ee mushaharka lagu qaato iyo kordhinta waxbarashada xanaanada dugsiga kahor iyo xuquuqda LGBTQ, in la ilaaliyo dadka dhibanaha u ah tacadiga galmada, wax ka badalka doorashada, iyo kaalmada safmarka ee shaqaalaha iyo ganacsiyada yaryar.

Seattle waxay maraysaa isgoys muhiim ah, oo iminka waxaa la gaadhay wakhtigii talaabo wax ku ool ah la qaadi lahaa oo lagaga gudbayo xaalada sugitaanka oo la samayn lahaa dhabadii la mari lahaa iyada oo Seattle oo dhan u midaysan tahay, oo wadaagaysa midhaheeda. Seattle oo ah meel kala duwanaanshaheenu uu yahay waxa aynu ku xooganahay, dhamaan noocyada ganacsiyada ayaa kori kara, oo shaqooyinkeena ayaa bixinaya mushaharkeena hawlgabka. Seattle ku hogaamisa caalamka ilaalinta cimilada, leh guryo amaan ah, oo jaban oo dadka oo dhan awoodaan, oo wax ka badasha cadaalada danbiyaha iyo amaanka shacabka si ay u buuxiso xuquuqda madaniga ah wakhtigan.

Murashaxaan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Ann Davison
Magaca Ololaha: Jaarka Ann
Websaydka ololaha: https://www.neighborsforann.com/
Goobta Magaalada: Qaraanka Magaalada
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-775-8838
Hordhaca Murashaxa:

Waxaan u tartamayaa Qareenka guud ee Seattle City sababtoo ah magaaladeenu waa inay heshaa iyaddoo ay tahay ku guul daraysiga inay buuxiso baahiyaha kuwa ugu itaalka darran siiba shaqooyinka aasaasiga ah ee ilaalinta caafimaadka dad waynaha iyo badbaadada

Sanadkii 2008, u lugaynta guriga maxkamadda faras magaalahu waxa uu ahaa badbaado. Wakhtiga aan lahaa ilmaha labbaad 2011, jidadkeenu waxay noqonayeen kuwa khatar ah. Hadda, shaqaalaha iyo xubnaha xeer beegtida waxaa loo sheegay inay isticmaalaan albaabka muhiimka ah sababtoo ah waa badbaado. Si la mid ah ayaa la odhan karaa qaar badan oo ka mid ah xaafadaheena.

Carruurtaydu waxay bilaabeen inay i waydiiyaan su'aalo ku saabsan sababta dadku ay ugu ag noolaayeen jidadka Seattle xaalado aan wanaagsanayn, ka aadminimo yar xeryaha qaxootiga Qaramada Midoobay halka ay kala shaqeeyay dadka ka baxsanaya dagaalka sokeeyaha ah. Xataa carruurtayada way garanayaan waxa ka dhacaya magaaladeena in aanu sax ahayn

Waxaan bixin doonaa hogaamin dheelitiran oo inaga dhigta kuwa ku wanaagsan: *ka hortagida* maaha kuwa ka fal celiya. Waxaan noqon doonaa hogaamiya wada shaqayn leh oo keenaya *naxariis,* raadinaya *horumar* oo dhisaya xidhiidho shaqo gudaha magaaladayada iyo gobolka si loo soo dabaalo badbaadada dad waynaha.

Hagaajinta xidhiidhkan dhabta ah ee caafimaadka dad waynaha iyo badbaadada, waxaanu bilownaa araga horumarka ku noolaashaha magaaladeena. Codkaaga, waxaanu ku abuuri karnaa magaalo badbaado leh, una naxariis badan dhammaan.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Seattle Ethics & Elections Commission

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Nicole Thomas- Kennedy
Magaca Ololaha: NTK4Justice
Websaydka ololaha: https://ntk4justice.com/
Goobta Magaalada: Qaraanka Magaalada
Lambarka Telefoonka Ololaha:
Hordhaca Murashaxa:

Seattle waxay u diyaar tahay cadaalad cusub iyo qorshaha badbaadada magaalada, oo la soo af jaro dembi ka dhigida faqriga iyo naafanimada iyo dib u maalgelinta bulshooyinka caafimaadka qaba *ee dhammaantood.* Waxaanu u baahanahay Qareenka Magaalada kaas oo fahmaya in ciqaabida demiyada yaryar keliya ay xasilooni darro ka abuurto hadda ka hor meesha ugu saamaynta badan sinaan la'aanta Seattle. Ciqaabtu kamay dhigin bulshooyinkeena si ka badbaado badan, oo weli, magaaladu waxay kharash garaysaa malaayiin sanad kasta dacwadna ku soo oogaya xubnaheeda bulshadda naafada ah aan hoyga lahayn, BIPOC, faqiirka ah. Waa wakhtigii isbeddelka.

Waxaan u baahanahay in si dhow looga weecdo qaababka ka falcelinta iyo ciqaata ee todobanaankii sano ee la soo dhaafay. Halkii lacagta laga khasaarin lahaa dacwad ku oogida shakhsiyaad wixii ah fashilaadaha nidaamsan, waxaan xooga saari doonaa tallaabo sharci oo u oggolaan doonta Seattle inay ilaaliso oo sare u qaado caafimaadka, deegaanka badbaadada, iyo daryeelka koowaad ee dadka. Waxaan u dagaalami doonaa kiraystaha iyo xuquuqda shaqaalaha, guryo lagalo oo la awoodi doono, iyo ka noqoshada isticmaalka shidaalka dhulka laga soo saaro.

Seattle waxay noqon doontaa mid ka badbaado badan marka aynu joojino ka abuurka xasilooni darida kuweena ugu itaalka daran dhexda xaabin iyo xabsi ku ridka. Qareenka Magaalada Waxaan kala tuuri doonaa nidaamka aanu ognahay inaanu shaqayn. Waxaanu soo af jari karnaa xabsi u dirida dadka badan ah, iyo beddelkeed, waxaan siin karnaa baahiyaha aadamaha. In sidaas lasameeyana, waxaanu dhisi doonaa seeska muhiimka ah ee loo baahan yahay si loo sameeyo cadaalada runta ah iyo badbaadada dhabta ah ee dhammaan Seattle.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Kenneth Wilson
Magaca Ololaha: Ken For Council 8
Websaydka ololaha: KenForCouncil8.com
Goobta Magaalada: Gollaha Magaalada Booska 8
Lambarka Telefoonka Ololaha: 206-637-4994
Hordhaca Murashaxa:

Gollahu waxa uu ku socdaa jidka khaladka ah. Saiyaasiyiinta xilka haya ma heli karaan xalalka hoy la'aanta kordhaysa, jidadka iyo kaabbayaasha fashilmay, iyo ganacsiyada xidhmay. Waxaan ku waydiisanayaa codkaaga si loo keeno xal macquul ah oo lagu beddelo maamul xumadda hadda jirta.

Si cadho leh, waxaan u daawaday faras magaalaha oo noqday meel aan sharci lahayn oo qaqarsoon, wakhtiyada jawaabaha 911 way kordheen, sarkaalka maamula booliska waxaa lagu khasbay inuu hawlgab noqdo, oo West Seattle waxaa laga jaray magaalada iyaddoo ay sababtay dayac tir la'aan liita iyo khaladyo joogta ah oo maamulka iyo kaabbaayaasha qiimaha badan ah. Caqabadaheena hoy la'aanta waxay noqdeen kuwa xad dhaaf ah oo aan la taakulayn, marka beeraha lagu nasto iyo dugsiyada ay gabood u sameeyeen dadka qabatima maandooriyaha iyo dhibaatooyinka dhimirka. Horumar kasta oo cusub waxaan waynaa barande/geed wayn oo muhiim ah, iyaddoo ay weheliso kirada guryaha oo lagu beddelay shan ila ahal guryo aan la kiraysan karin sii adkaynaysa dhuumaha bulaacada jirta

Waxaan ahay 28 jir degen Seattle, xaakayga iyo labba hablahayga ah ayaa ku dhashay halkan. Waxaan injineerka dhismaha biriishyada ruqsada haysta (PE SE) oo haysta ganacsigayaga injineeriyada yar ilaa iyo 2005. Sida xubin ah gollahaaga deegaanka ah, waxaaan xoog ugu tiirsanaan doonaa nidaamintayda, injineernimada, iyo 30 sanadood oo waayo aragnimo ah oo aan ka shaqaynayay gaadiidka iyo mashaariicda kaabbayaasha hoose si loo keeno go'aamo macquul ah iyo horumar maamula la socodka tallaabooyinka Gollaha. Waxaan leeyahay khibrada loo baahan yahay si looga dhigo Seattle magaalada aynu doonayno.

Murashaxan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Teresa Mosqueda
Magaca Ololaha: Dadka ee Teresa
Webseetka ololaha: TeamTeresa.org
Jagada Magaalada: Gollaha Magaalada Seattle Booska 8
Lambarka Telefoonka Ololaha:
Hordhaca Musharaxa:

Waxaan u tartamayaa dib u doorashada sababtoo ah magaaladeenu waxay maraysaa is goysyada muhiimka ah. Inteena ka shaqaysa, ku nool magaalada, booqashada ku yimaada Seattle wax badan ayaynu wadaagnaa oo aan ahayn kala qaybsanaanta bulshada ee la doonayo in aynu rumaysano. Muddada wakhtigayga Gollaha, waxaan isku keenay isbahaysi kala duwan si looga gudbo isbeddela siyaasada saamaynta badan. Laga soo billaabo Xeerka Xuquuqda Shaqaalaha Maxalliga ah illaa qorshaha dakhliga ee JumpStar Seattle iyaga oo wada jir ah ayay xulafadaasi diiradda u saareen baahida guud, inaga oo midaysan ayaynu guntiga dhiisha iskaga dhignay si aynu u dhisno Seattle ku salaysan qiyamka aynu wadaagno.

Waxaan u huray mihnadayda si aan u hubiyo inaan qofna laga tegin ama aan xaga dambe looga soo dhaqaaqin. Waxaan barbar istaagtay qoysaska shaqeeya, haweenka, dadka midabka ah, muhaajiriinta iyo dadka mushaharka yar qaata si loo xaqiijiyo arrimaha ugu cadaadiska badan ee wajahaya magaaladeena in wax laga qabto. Taageeradaada joogtada ahna, waxaynu ku caawin karnaa dhammaan jaarkeenau inay ka soo kabtaan COVID dhibta caafimaadka dad waynaha iyo gaabiska dhaqaalaha, in wax loo qabto dadka aan haysan guryo ay ku noolaadaan iyo guryaha la awoodi karo, fursado badan oo waxbarasho in loo sameeyo iyo daryeelka caruurta, in la abuuro shaqooyin mushahar wanaagsan oo lagu noolaan karo leh, iyo in la maalgeliyo caafimaadkeena, gaadiidka, iyo kaabayaasha. Waad ku mahad san tahay ka fekerka ku deeqida foojarada dimuqraadiyada (democracy vouchers) -- foojarkiiba hal foojar, qofkiiba hal qof, aan wada dhisno Seattle ka xoog badan.

Murashaxan waxa uu ka qayb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Nikkita Oliver (iyagu / iyaga / kooda)
Magaca Ololaha: Nikkita for the People
Webseetka ololaha: www.nikkita4nine.com
Jagada Magaalada: Seattle Booska Gollaha Deegaanka magaalada 9
Lambarka Teleefoonka Ololaha: (206) 712-2778
Horudhaca Musharaxa:

Qalalaase aan horay loo arag wuxuu dalbanayaa jawaab wax ka badal ah. Xalalka ugu badan ee isbedelka keena waxay ka yimaadaan kuwa sida aadka ah u saameeya dhibaatooyinka aan wajaheyno.

Waxaan ahay u doode, aqoonyahan, farshaxan, abaabulaha bulshada, iyo qareen. Anigu waxaan ahay kirayste. Waxaan ka soo shaqeeyay kulleej, iskuulka sharciga iyo dugsiga qalin-jabinta. Waxaan la kulmay xasillooni darro guri oo waxaan ku seexday gaarigeyga. Aniga oo ah badbaadiye rabshad guri, waxaan ogahay waxa ay tahay in lagu sugnaado xaalad xun maxaa yeelay ma jiraan guryo la awoodi karo iyo cid aan wacayo. Waxaan ahay agaasime fulineed oo aan macaash doon ahayn oo bilaabay sidii adeeg bixiye bixiya adeega safka hore ah. Qareen ahaan waxaan ku taageeray macaamiisha iyada oo loo marayo ka-reebitaanka dugsiga, ka saarista, iyo kiisaska takoorka.

Waxaan gacan ka geystey aasaasidda mid ka mid ah barnaamijyadeenna soo-celinta dib-u-habeynta caddaaladda ee gobolkeenna (RJ) -Caddaaladda wax qabadka leh. Waxaan sii wadaa inaan qeyb ka noqdo horumarinta istaraatiijiyadda RJ ee Degmada King sida Wadooyinka cusub ee Beesha ee Dib-u-Celinta iyo Dib-u-habeynta Dhallinyarada (YAC) oo ay weheliyaan Wadooyinka Bulshada iyo Africatown Community Land Trust. YAC waxay isla meel marin doontaa guryo bilaash ah iyo adeegyo jaban iyo adeegyo loogu talagalay dhalinyarada ku nool SE Seattle.

Shaqada aan qabto waxay ku saleysan tahay khibradeyda noloshayda iyo tan xirfadeed labadaba, laakiin tan ugu muhiimsan waxaa lagu qabtaa bulshada ugu saameynta badan.

Musharaxaan waxa uu ka qeyb galayaa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Hordhacyada Murashaxa

Magaca Musharaxa: Sara Nelson
Magaca Ololaha: Sara oo u taagan City Council
Webseetka ololaha: Saraforcitycouncil.com
Jagada Magaalada: Seattle Booska Gollaha Deegaanka magaalada 9
Lambarka Telefoonka Ololaha: (206) 910-8762
Hordhaca Murashaxa:

Seattle waxaa weeye magaalo cajiib ah, oo nasiib leh. Waxa aanu leenahay khayraad cajiib ah iyo jaarar si dhab ah midba midka kale u daneeyo. Waxa aanu ku jirtaa wakhti adag oo magaaladeenu ma bixiso – xataa adeegyada aas aasiga ah. Waxa aan ugu tartamayaa Golaha Deegaanka maadaama oo aan ogahay in aan hormarin karo nolosha Seattle anaga oo ka wada shaqaynayna natiijooyinka la cabiri karo.

Inta aynu kasoo kabayno COVID, waxa aanu u baahanahay hogaan xaafadeena si xoogan usoo celin kara. Mid kamid ah aas aasayaasha ganacsi yar oo qoys, waxa aqaanaa sida bulsho xasiloon looga soo dhiso hoosta. Fremont Brewing, waxa aanu u qabanaa wax wanaagsan shaqaalaheena, waxa aanu wax ku celinaa bulshadeena, oo waxa aanu ku hogaaminaa waaxda xasilooni. Sidoo kale, waxa aanu samaynaa khamri wanaagsan!

Waxa aanu aragnay wax badan oo laga yidhi bilaa guryaha iyo adeegyada aas aasiga ah, laakin natiijo ku filan maanaan arag. Waxa aan mar kasta diirada saaraa in aan wax qabto. Lataliyaha siyaasada ee Golaha Deegaanka ahaan, waxa aan qoraa sharciyada ka caawiya in Seattle ay noqoto hormuud qaran oo siyaasada deegaanka ah. Xildhibaankiina ahaan, waxa aa hagaajin doonaa wadooyinkeena iyo biriishyadeena, waxa aan ka shaqayn doonaa beeraheena, waxa aan yarayn doonaa dadka bilaa guryaha ah oo waxa aan soo celin doonaa kalsoonidii dawlada magaalada lagu qabay.

Waxaa la gaadhay wakhtigii ay magaaladeenu kusoo noqon lahayd aas aasiyaadka iyo ka dhabaynta balanta. Ugu codee Sara Nelson Golaha Deegaanka Magaalada!

Murashaxaan kama qayb gelayo Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).